# Golaha Wakiilada JSl

*Minuteska*

Dooda Xeerkii Xadaynta Mushaharooyinka Golayaasha Qaranka.

**10-13.11.2010**

## Xill. C/raxman Maxamed Jaamac.

Xeerkan oo ah waajibaad dastuuriya sida Qoddobada 47^aad^, 65^aad^ iyo 87^aad^ maadaama mudo dheer la lahaa Madaxwaynuhu wuxuu ka mushahar badan yahay Obama.
Sidaa darted anoo taageersan ansixinta xeerkan, waxaan wax ka badalayaa.

**Q odobka 6^aad^**

- farqada 2^aad^ waxaa ku qoran aan ka badnayn 50% waa in lagu badalaa *" oo ah 50%"* waayo ma cada oo ambiguity baa imanaya.
- **Farqada 6^aad^** waxaan soo jeedinayaa farqadan xaga danbe waa in lagasii daraa. "*oo daahfuran ama xaquuqan ( transparent) lagana saaro mushaharka ay qaataan Madweynaha iyo M/xigeenku"*

  **Qodobka 7aa**
- Mushaharka madaxwaynahu wuxuu ka badan yahay toban laab kan mudanyaasha, markaa anigu waxaan soo jeedin lahaa inaanu ka badnaan saddex-laab.

**Waxaan soo jeedinayaa:-**

- In xeerkan loo baahanyahay oo la xadiddo mushaharka madaxdaa, lana meel mariyo.

## Xill. C/raxman cismaan caalin

Runtii waxaa farxad gaara ii ah in Goluhu isku soo hawlay xeerkan oo mudo hore golaha doodiisu hore uga baxday, oo aan mar labaad xil iska saarnay.

Hadaba anigu mudanayaal waxaan qabaa xeerkani inuu yahay xeer dastuuriya, ee aynu ka doodno nuxurkiisana meel dhigno, sidaa darteed waxaan qabaa inaynaan isku arag dad mushahar korodhsanaya ee aan aynu isku aragno dad waajibaadkoodii saarnaa gudanaya oo waliba habsanka ah, markaa yaynaan u arkin mushkilada aynu galnay.s

Mar labaadka waa inaan tixgalinta siino meesha maanta dalkeenu marayo iyo wacyiga lagu jiro intaasi waa iga talo.

Xeerkana hadaan hoos u galo.

- bayjka hore ee xeerka halka marku ogaaladay waxaa ku dheeraada Kalmada oo ah ***Dejininta*** ee ha  laga saaro.
- Isla bayjka hore halka markuu tixgaliyay iyana ha laga saaro **lagana wada qayb qaatay doodiisa.**

**Qodobka 2aad**

- Farqada 3aad waa ina kalmada Good governance laga saaraa waayo meesha kuma haboona.

**Qodoboka 4aad** Mushaharooyinka iyo Kharashaadka dheeraadka

- Xeerka ha lagu soo koobo Mushahar joogto ah iyo Guno fadhi, laakiin kharashka halkan danbe ku qoran ha laga daayo iyo  expenseska kale.

**Qodobka 5aad**

- **Farqada 2aad** dhamaan farqadani waa qayrul dastuuri waa in dhamaan xeerka laga saaraa.

**Qodobka 6aad**

- **Farqada 4aad** anigu waxaan soo jeedinayaa Hadii mushar jooto ah iyo guno fadhi aan ogolaanay, markaa  wax  kale kuma haboona ee farqadan iyana meesha ha laga saaro.
- **Farqada 7aad** xeerkan waxyaabaha uu ka dhashay lumpsum fundkii madaxtooyada u qornaan jiray in mushahar uun noqdo, markaa Fundska madaxtooyadu ku shaqaynayso wuxuu galayaa Miisaaniyada Madaxtooyada ugu jirta, halkan waxaan ku qeexaynaa mushaharka oo keliya

**Qodobka 7aad**

madaxwaynaha waxaa ku qoran wuxuu yaalanayaa mushar ee ma yeelanayo, markaa waxaa arkaa unfair markaa taas dib ha loo saxo**.**

**Qodobka 10aad**

Farqad 3aad ayaan ku soo kordhiyay oo waxaa keenaya qodobka 11aad waxaa uu sheegay inuu hawl gab jirayo. Hadaba farqada 3aad waa inaan xeerka ku waajibinaa in la soo diyaariyo siyaasadii hawlgabka.

**Qodobka 13aad**

Wuxuu sheegayaa in xeekan uu dhaqan galayo January 2011 markaa waa inaynu ansixinaa oo madaxwaynuhu saxiixaa, markaa ayaa dhaqan gali karaa.

## Xill. Jaamac Xasan Aadan.

Annigu waxaan **soo jeedinayaa:-**

- In maadaama Wasiirkii maaliyadu inala balamay oo yiri wixii dakhili ah waxaa la ogaan doonaa 15 bishan aynu sugno.

## Xill. Axmed Maxamed Diiriye

Annigu waxaan **soo jeedinayaa:-**

- sidii Jaamac Xasan Aada, in maadaama Wasiirkii maaliyadu inala balamay oo yiri wixii dakhili ah waxaa la ogaan doonaa 15 bishan aynu sugno

## Xill. Saleeban Cawad Cali

Anigu waxaan qabaa maaha xeerkan in lagu xuuxiyo cid gaara ee xeer dastuuriya oo waajib tahay ina saaran samayntiisu, wada shaqaynta xukuumada iyo goluhu ee yaan la isku xoqin, Goluhu wuxuu sharci u leeyahay inuu xeerka sameeyo iyana xukuumada waxay xaq u leeyihiin inay yiraahdaan waa xaq waa la qaadi karayaa ilayn iyagaa dakhliga uruuriyee wayna soo dhoweyn xukuumadu.

Hadii aan xeerka sii gudo galo waxaa weeye
**Qodobka 3aad** erey bixinta halka farqada D ee golaha wakiilada iyo guurtida anigu waan kala horumarin lahaa oo golaha guurtidaan soo horaysiin lahaa.

**Qodobka 6aad** erayga **aan ka badnayn** in laga saaro mugdiga ayaa wanaagsan waxaan qabaa in laga dhigo **ah** oo lagu xadido.

**Farqada 2aad** Xarafka E. ee **gunada gaadiidka** anigu waxaan qabaa gunooyinka wixii isqaadan kara in la isasaaro, laakiin sida uu u qoranyahay ha laga badalo oo loo bixiyo **shidaal.**

**Farqada 6aad** waxaan qabaa in meesha laga saaro oo guno shidaal uu noqoto.
**Qodobka 7aad** ee mushaharka, mar walba waxay ku xidhnaanayaa budget constrains bajadkaad haysato oo wax la haysto oo la qaadi karo, markaa anigu figuresa meesha ku qoran duuduub ahaan anigu waan soo dhowaynayaa, wasaarada maaliyaduna way soo dhowaysay waliba ka badan in la awoodo ay sheegtay.

**Waxaan soo jeedinayaa:-**

- in xeerkan waxa ka dhiman laga saxo oo la meel mariyo

## Xill. Maxamed Nuur Caraale

Anigu waxaan ka hadlayaa laba qodob oo toos u taabanayaa:-

- Mid waxaa weeye mooshin laftigiisa sida uu u qoran yahay iyo waxyaabaha aan ku daraayo

- Muuqaalka guud ee mooshinkani uu siyaasiyan yeelanayo, waxaana ka horaysiinayaa in la abuuro xeerkan waa dastuuri, oo gudiga dhaqaalaha oo aan ka mid ahay xeerkan waxay abuurtay 2066dii, markaa xeerkani mid cusub maaha saaka,

  Markaa waxaan tilmaamayaa xeerkani sifihii ma leeyahay qaab, sharci ahaan, nidaam ahaan iyo luuqada ahaan.

Waxaan cadaynayaa qodobo badan oo u diidaya xeernimo.

1. Shuruucda dalka u dajisan waxaa ugu horeeya eray bixinta halka qodobka 3^aad waxaa ku qoran eryo kooban oo eray bixintoo macruuftahay, halka qodobo kale oo ka muhiimsanaa oo xeerka ku qornaa ay ka maqan yihiin.

2. Xeerkan waxaa ka maqan qaybo badan oo muhiima, wuxuuna ku urursanayahay nuxurkiisu kalmada Mushahar, kalmadaha uu eray ahaan ku qoran waxay ka fogyihiin qaab sharciyaydeed, waxaan ku qoran sida:- *Hadba intii uu u baahdo, hadba laba mushahar tuu doono*, ma laha shuruucda dalku mana siiyaan qofka joyska uu doonayo, laakiin waa xukun cad oo go'an.

Laba mushaharna qofna xaq uma laha oo mawada qaadan karo markaa qodobkaasi waa khalad, sidoo kale Gunooyinka (*waxaa uu xaq u yeelan karaa)* baa ku qoran, markaa Wuu yeelan karaa ama yeelan karo wax ka dhaxeeyaa ma jirto, markaa qodobkaasina waa khalad.

Marka la eego dhaqaalaha dalka iyo mustawaha aynu taagan nahay, waxaad mudanayaaal inoo sooqorteen 6,500,000 sl sh/= ah oo basic salary ah, oo manta marka lacag adag lagu badalo noqnaysa $1140 iyo guno ka baxsan mushaharka oo aan ka dhigay anigu 100% mushaharka ama ka badanba. Gunada iyo mushaharka marka la isku daro waxay noqdeen 13 malyan oo sl sh/= ah,

Qodobka dhaqan galka xeerku way ka duwantahay xeerarkii hore, oo waxaa ku qoran January 2011, dhaqan galkuna wuxuu ku fulaa marka Golayaashu ansixiyaan madaxwaynuhu saxiixo.

**Waxaan Soo jeedin:-**

- In mooshinkan dib loogu noqdo oo xeerarkii Golaha yaalay lalla darso
- In la qiimeeyo xaalada dalka oo horta hadii wax la kordhinayo dadka baahan ee shaqaalaha iyo ciidamada loo kordhinayo.macquulna maaha iyadoo taa la dhamaystirin.

**Xill. Siciid Cilmi Rooble**

Anigu waxaan leeyahay umada yaan la majara habaabin waxaynu shalay ku haysanay dawaladii hore yaynaan ku wacad furin dadka, wixii dawladani balanqaadayna Golahan waa laga fulinayaa, waxaa nasiib wanaag u ah xukuumadani inay suurtagaliso madaxwaynuha Qaranku inuu  mushahar qaato oo aanu qaadan $62 kun oo dollar, maalinbana walba la helimaayo siilaanyoo kale iyo Maxamed Xaashi oo diyaar u ah inuu shalay wuxuu ku hadlayay fuliyo.

Waxaan kale oo idiin sheegayaa in mudnaanta kowaad ay leeyihiin shaqaalaha iyo ciidamada in loo kordhiyo mushaharka, labada mooshina kaasaa ii horeeyay, halkan waxaan ku soo qoray mushahar iyo guno 1-50% ah ee sharciyeeya idinku laakiin waxba kama jiraan inaan $2000 ku qorantahay.

Miisaaniyada Goluhu waa $1,400.000 oo dollar, tan guurtiduna waa $1,300,000 oo dollar golayaasha aan mushaharka u samaynaa $2,700,000 oo dollar weeye sanadkii hore, markaa mushaharka aan imika sameeyay waxay noqonaysaa $3,900,000, markaa $1.300.000 ayaan kordhiyay oo 50% ah.

**Waxaan soo jeedinayaa:-**

- Anigu dhamaan qodobada C/raxmaan dheere waan sekenment gareeyay, shaqaalaha iyo ciidamada waa in loo kordhiyaa intii la balanqaaday oo miisaaniyada lagu soo daro. Iyo
- In xeerkan uu dhaqan galo. Oo la meel mariyo.

## Xill. Maxamed X. Xuseen ciise

Anigu waxaan qabaa wixii macquula baa la kordhinayaa markaa yaan sharciga la haabaabinin, oo aynu noqono mudanayaal si wax u wada arka

Xaga xeerka waxaan soo jedinayaa;'- **Qodobka 3aad** ha la soo horaysiiyo oo ha laga dhigo qodobka 1aad, eray bixinta ayaa xeerka ugu horaysee.

Gunooyinka qaar ha laga saaro, sida gunada caafimaadka, Mudanuhu malaha guno xilleed ee wuxuu yeelan karaa guno fadhi, guna xilliyeedkana waxaa yeelan kara sida shirgudoonka, sidoo kale waxaan qabaa in labada shirgudoon ee labada gole  ay sinaadaan.

**Soo jeedin:-**

- Waa in la ansixiyaa xeekan, oo la dhaqan galiyaa.
- 

## Xill. C/qaadir jaamac xaamud

Anigu waxaan qabaa sidii hore in mushaharka shaqaalaha la soo horaysiiyo, ilayn isagaa horeeyay, xaga xeerkana waxaan qabaa:-
**Qodobka 5aad** far. 2aad in meesha laga saaro, sidoo kale waxaan soo jeedinayaa in gunada safarka, shidaal lagu badalo.

**Gabo gabadii waxaan qabaa:-**

- In xeerka la ansixiyo
- In shaqaalaha iyo ciidmada korodhkoodii la sameeyo oo miisaaniyada 2011 ay ku jirto.

**Xill. c/qaadir X. Ismaciil jirde.**

Xeerkan dhamaantii waxaan qabaa inuu yahay xeer waafaqasan sharciga, oo waa dastuuriya. xeerarkale kale dalka iyo xeerhoosaadka Golaha, sidaa daraadeed in laga doodaa waa xalaal. odayaal qaran baa ka hadlay saxaafada oo mana ay saluugin laakiin xiliga ayay yara saluugeen.

Anigu Golaha waxaan ku soo jiray dhawr toban sanadood, golahani waxaa caado u ahayd inay curiyaan kuna guulaysataan in mushaharka shaqaalaha iyo ciidamadana la kordhiyo, marar badan oo ay dhacdayna xukuumadii markaa jirtay maryo dhiiglay kula furatay,waana inoo caado markasta inagu inaan curino iminkana diyaarbaynu u nahay. Golahani iyo kuwuu ka horeeyayba dhaqan iyo hido umay lahayn inay mushaharka kordhistaan, mushaharkii ugu u horeeyay isagoo goluhu qaata 60.000 bishii waa golihii 1997kii, markii inflationkii oo ay $10 noqotay ayuu marxuumkii miisaanayadiisa 600,000 uu ka bixiyay ee mushaharo goluhu korodhsday may ahayn, intaa intii ka danbaysayna goluhu wasaarada maaliyada kumuu noqon ee miisaaniyadiisuu xagxagan jiray.iminkana teenaa mooyee wax kaloo meesha imanayaa ma jiraan. 1994 xillidhibaanadu waxay qaadan jireen 60,000 oo u dhiganta $1200, shaqaalahana darajada A=$600 B= $400, C=$300.

Mudanayaal hadaynu usoo noqono mushaharka iyo gunada iyo shaqaalaha establishementigii 2009 baan hayaa, mushaharka iyo gunada shaqaalaha saamiga ay ku lahaayeen miisaaniyada waxay ahayd %16, mushaharka ciidamaduna wuxuu ahaa 25%. Labada Golahwayne iska joogtay ahayd ilaa wakhtigii hore 4.3%, waxaan qabaa iyadoo percentagekaa iyo saamigiiba laga gudbin in mushaharkii ciidamadana iyo shaqaalahana la heli karo, taa waxaan ku salaynayaa odoroska korodhka miisaaniyada, miisaaniyada anigu waxaan u soo qaatay tii 2009kii waayo tii 2010kii doorashaa lagu jiray,oo iyada sal lagama qaadan karo,

Hadii tan miisaaniyada 2011ka lagu saleeyo tii 2009kii oo aynu odorosno sidii wasiirka maaliyadu halkan ka sheegay ee uu yidhi 3 biloodka waxaan rajaynaynaa in 30% ay korodho. Haday korodho 30%kaa miisaaniyada 2011 waxay noqonaysaa 400 oo bilyan, waayo isagu wuxuu ka qiyaas qaatay tii 2010 oo ahayd 310 bilyan. Markaad 30 kordhiso 400 bilyan bay noqonaysaa.

400 bilyan mushaharka shaqaalaha iyo ciidamada waxay ka dhigaysaa 65.2 bilyan tii 2009kiina waxay ahayd 43 bilyan, hadii aynu ku salayno A,B iyo C oo lacagtaynu sheegaynay siino $600,$400 iyo $300 way ka faynaysaa oo korodh meelkale ka imanayn. Haday ka badatona oo ay noqoto 480 bilyan oo ah 55%, haday dhacdona 78.2 ayay noqonaysaa tan shaqaalaha.

Waxaad ka qiyaas qaadataa 2009kii oo ahayno saamiga mushaharada iyo gunooyinka shaqaalaha oo ay ku jiraan 49 wasiir,  waxay ahayd 43 bilyan, haday 30% korodhana waxaa kordhaaya 20 bilyan oo sl sh/=. 20gaasi way ku filantahay korodhka shaqaalaha meelkalena ka dooni mayno.

Waxaa timi tii Ciimada oo aan idiin sheegan inay qaataan 66 bilyan weeye, hadaba hadaynu ku salayno odoroskaa aynu sugayno oo aynu miisaaniyadu 2011 ha korodho 30%. 66 bilyankaa ay qaadan jireen saamigooda  waxay noqonaysaa 100, bilyan, hadii ay 45 bilyan noqotana waxay noqonaysaa 112 bilayan haday 48 bilyan noqotana 120  bilyan. Markaa ciidamada hadaad derajada u hoosaysa siiyso $200, derajada 2aad siiso $300, qolada 4000 ahna $4000 siiso, saraakiishana aad average $7000 siiso, intaas oo dhan waxaa kafayn kara korodhka odoroska miisaaniyada %30 ee wasiirku sheegay,
Hadaan mushaharka Madaxwaynaha, ku-xigeenka iyo golahayaasha sharci dejinta.

Mudanayaal Xadayntaasi macnaha ay inoo samaynaysaa waa laba qodob:-

- In mashaariic la helo oo international communitiga ina aamino oo aynu waxeena xafidano, waayo su’aasha laga jaawaabi kariwaayay waxaa weeye, madaxwaynuhu imisuu qaataa ku-xigeenku imisuu qaataa wasiiraduna imisay qaataan hadaan itaa laga jawaabi Karin transparent ma jiri karo, hadaba si trasnparencygaa loo helo waa in marka laka xadeeyo oo la isku raaco in internetka laga galiyo oo ninka macaawino kuu soo wadaa halkaa ka arko, sidaa darted waa inagu ceeb inagoo intaa le’eg in la yiraahdo madaxwaynuhu wuxuu qaataa inta Clinton qaato, waliba anigu waxaan qabaa inay xaaraan tahay in dalka laga bixiyo mushahar ka badan $5000 oo dollar,

Markaa anigu waxaan soo jeedinayaa in madaxwaynuhu qaato $5000 ku-xigeenkuna $300 labada shirgudoona isku mid noqdaan waayo baratoolku waa sida loo fariisanayo kan midig xigaya iyo kan bidix xigaya, waxaan qabaa in laba Gudoomiye qaataan $2000 afarta ku-xigeena aan lakala qaadin oo $1500 oo basic salary ah inagana $1000 aanu ka badan. Markaa intaas la sameeyo waxaa kordhayaa anoo dollar ku qiyaasaya sanadka oo dhan 2,300,000 oo madaxwaynaha ku-xigeenka iyo golayaasha ah,

miisaaniyada Golaha oo 4.3% aan ku qiyaasay saamilayda haday 30% korodho miisaaniyada goluhu waxay noqonaysaa 17 bilyan halkay manta 10 bilyan ka tahay oo ay 3% korodho 45% waxay noqonaysaa 19.4 bilyan, markay 55% korodhana waxay noqonaysaa 20% way ka badanaysaa.

Xaga gunooyinka waxaan qabaa inaan fixed laga dhigin oo iyadu wacyigay ku xidhantahay marna way korodhaa marna way yaraata, marka adhi gabadu dhacdana waxaa yaraadaa waa gunooyinka markaa ha loo daay hadba cidii shaqo

ku leh, cida kaliyee golaha guno xiliyeed yeelan kartaana waa shirgudoonka xilldhibaanadu waxay yeelan karaan guno fadhi.

Markaa waxaan **soo jeedinayaa**

- Annigu waan waafaqsanahay in xeerkan la sameeyo, oo xeerkan loo baahan yahay si loo xadeeyo mushaharooyinka iyo gunooyinka.

**Xill Xasan Cawaale Caynaan**

Horta xeerkani waa xeer jira oo dastuuriya in la sameeyona waa shaqadeenii, laakiin laba arrimoodba:-

- Waa in xeerka dib loo dhigaa oo maanta ma korodhsan karno, waayo hadii mushaharooyinka madaxda la soo horaysiiyo waa mid meel kaga dhacaysa maanta dalka, loomana baahna, ilaa inta 300% kii kulmiye balan qaaday inuu shaqaalaha iyo ciidamada u kordhinayo la hirgaliyo.

**Waxaan kaloo soo jeedinayaa:-**

- In ardayda jaamacadaha  ka soo baxaysa shaqo loo sameeyaa, maanta waxaan jeclaan lahaa in xeerkii shaqa la'aanta yaraynayay la soo dhigo,  halka kan laga hadlayo si shaqo loogu abuuro da'yarta aqoonyahanka ah.
- In xeerkan waa xeer dastuuriya oo jiree, ee sanadkan dib loo dhigo inta shaqaalaha iyo ciidamada loo kordhinayo.

**Xill. Xuseen Ismaciil Ibraahim**

Anigu waxaan waafaqsanahay inuu xeerkani yahay xeer dastuuriya, meelo badan baa dastuurka kaga taal xeer baa qeexaya waa inaynu dhamaystirnaa distoorka, kanina waa xeerkii kala xadaynta mushaharooyinka waana xaq inaynu samaynaa, sidoo kale.
Dawlada lafteeda waa loo bandhigay waa ogyihiin, laakiin inaga yaanay waxba inagaga xumaanin, oo xilldhibaano ayaa wax korodhsanayaa la yidhi, xeerku waxbuu kala xadaynayaa.

Waxaynu xaq u leenahay inaynu jahayno siyaasada dhaqaale, tan nabadgalyo iyo mid walab ka hadalno dawladana saxno. Anigu waxaan odhan lahaa sidaa c/qaadir u soo bandhigay halaga dhigo oo sidaa ha ku socoto, waa na filayaa in excess farabadan u soo hadhay dawlada oo ay samayn karto shaqo abuuris.

Ninka xilldhibaanka ahi waxaa uu qaataa $300 inflationa waa jiraa sidaa darted waa in aynu xeerkan ansixinaa oo cod ku kala baxnaa.

**Xill. Mp tukaale**

Annigu waxaan qabaa arrinta aynu halkan kaga hadlaynaa waa xeer ay waajib tahay inaynu samayno oo qaranku yaasho dadkuna sidaa ha u fahmaan yayna si kale u fahmin,

Shaqaalaha 300% ee kulmiye balanqaaday waa in la hirgaliyaa oo miisaaniyada ayn taasi ku jiran yaynaan ansixinin, xukuumadii hore waxay amaan ku mutaysatay saddexdii doorasho tan waxaa looga fadhiyaa inay waxay taariikhda ku gasho la timaadao oo musuqmaasuqa iyo la xisaabtanka.

Xeerkani wax dhibaato ah qaranka ku keenayo ma jirtee miisaaniyadii golahaan kala haybaysanaynaa, iyo xadayntii mushaharka iyo gunooyinka madaxwaynaha iyo ku-xegaanka markaa yaan la diidin la xadeeyo mushaharka madaxwaynaha.

Xill. Cali Yuusuf

Xeerkan maanta laga hadlayaa wuxuu ku salaysan yahay distoorka qaranka oo loo codeeyay 2001kii, ilaa maantana waa qabyo dadwaynuhu waxay khaatiyaan ka taagan yihiin xeerbaa qeexi doona, Qodobka 47aad wuxuu sheegayaa golaha wakiilada mushaharkooda iyo gunadoodaba xeerbaa qeexi doona, Qodobka 65aad golaha guurtidana mushaharkooda xeer baa qeexi doona, qodobka 87aad wuxuu leeyahay mushaharka madaxwaynaha iyo ku-xigeenka xeerbaaa qeexi doona.

Mudanayaal badan baa soo jeediyay in loo baahan yahay daah-furnaan (transparent) oo lagu xaman madaxwaynaha iyo ku-xigeenka obama ayay ka mushahar badan yihiin, markaa waxaa loo bahanyahay in mushahar ay ku noolaan karaan oo dalkuna qaadi karo in golahani waajibkooda tahay inay xadidaan.

Waa inaynu wax walba xadidnaa oo wax xukuumada lagula xisaabtamo aynu samaynaa, golahin wuxuu taageeri jiray in mushaharka loo kordhiyo ciidamada iyo shaqaalaha, dawladana waxaan leenahay miisaaniyad aanay ku jirin 300% in kordhiyay yaan la keenin.

Hadaan xeerka u soo noqdo, musharak gudoomiyayaasha labada gole waa inay isku mid noqdaan, waxaa halkan ku taal in xilldhaanku haduu geeriyoodo in musharkiisa iyo gunadiisuba mudo sanad ah u socoto, markaa musharkuu waa macquul oo waa fixed laakiin gunada waxaa lagu bixiyaa shaqo kolkaa hadii uu geeriyood waa in gunadaa meesha laga reebo. at end, maalinta u danbaysa waxaan kula baxaynaa waa gacantaag

**Xill. Xariir Siciid Bulaale**

Anigu waxaan qabaa inaan xeerkan loo arag si kale ee xeerku yahay mid qabyo ah dastuurina ah in la dhamaystirona loo baahan yahay, xeerkani dabayaaqadii 2006

ayuu golaha la horkeenay wuxuuna ka soconwaayay kala qaybsanaantii golaha, markaa manta hadii golihii isku duubanyaha yaan khalad yaan loo arag.

Hadaba inagoo xeerkan xaq u leh, waxaa ka wanaagsan marka shaqaalaha iyo ciidamada loo kordhiyo oo tooda meel la dhigo, aynu sugno oo keenan horta danbaysiisano. Oo waxaan odhan lahaa horta shaqaalaha iyo ciidamada ha la horaysiiyo si aan loo arkin inagu inaan wax korodhsanayno sidaasayna ku macaantahay.

## Xill. Siciid Maxamed Cilmi

Anigu isumaan taagin inaan xeerka ka hadlo, laakiin waxaan ka hadlayaa laba qodob:-

- Shaqaalaha iyo ciidamada mushaharkooda, horaynuna mooshin kan ka horeeyay ugu keenay oo wasiirkiina halkan inoogu yimi oo qodobkan ugu yeedhnay wasiirkuna waxa kaliya oo inagala balamay waxay ahayd mushaharka shaqaalaha iyo ciidamada oo inoo qabtay bishan 15keeda,
- Qodobka labaadna, iskuma diidanin inagu inuu xeerkan yahay mid loo baahanyahay madaxtooyaduna way ogtahay oo yaan la odhan way diidan tahay, markaa si xeego xeego ku u noqot ilkana u kala nabadgalaan waxaa loo baahanyahay si umada looga saaro in aynu wax korodhsanayno oo aynu arrintu u noqon isku xoqod, annigu waxaan qabaa in xeerkan soo baxo laakiin ra'yi baan qabaa in gudi loo saaro la kulanta madaxwaynaha waliba waxaa jira xubno golaha ah oo xilqaamay baa caawa la balansan oo aanigu ku jiro.

  Markaa inaynaan gacanta taagin kolay waynu taagaynaaye waa in aynu kala kulanaa madaxwaynahah iyo xukuumadiisa, qodobkaas ayaan anigu soo jeediayay.

## Xill. Maxamed Saalax Cige

Halkan waxaa inoo yaal xeerkii xadaynta mushaharooyinka madaxwaynaha, oo marwalba aad moodaysay inay siyaasad ku marnayd, waxaana qabaa in xeerkan samayno oo magac sumcad aynu ku helayno, hadii siyaasad laga galiyo danta ka fog waxaan qabaa in xeerkasi dhimanayo.

Markaa waxaan leeyahay mudaynaasha xeerka duray, waxaa mudan in xeerka si gaara looga hadlo,

Xeerku wuxuu u baahnaaa in wax badan lagu daro oo aad looga baaraan degom, wax badan baa ka dhiman. Magaca xeerka waxaa uu ka hadlayaa madaxwaynaha iyo

golayaasha, waxaanad moodaa in golaha si gaara loogu durayo, markaa kuma koobna golahane wuxuu taabanayaa halkii dalka u saraysay oo madaxwaynaha aha.

Xeer nidaamiya waxay madaxwaynuhu qaadanayo oo musuqmaasuq laga baxo muu jirin ee manta ayuu yaalaa.

Marka ugu horaysa xaasida ugu horaysa xeerka sida marka uu aqoonsaday kalmadaha ugu danbeeya waan ka saari lahaa

**Qodobka 3aad** waa eray bixintii ee hala soo hormariyo oo eray bixinta waa la soo hormariyaa, oo halkuu iminka qodobka 3aad ka yahay waa in laga soo horumariyaa oo laga dhigaa qodokba 1aad. Erayo badan lagu daro oo la qeexo
Magaca xeerkuna waa uu khaldanyahay, waxaanu u baahanyahay in la saxo magaca qodobka1aad lagu sheegay iyo kan xeerka ku qoran waa in la isla eegaa.

**Qodobka 2aad** qodobkaasi in habeeyo ayuu u baahanyahay oo ereyo sharci yeesho, oo lagu qoro wax u dhigma inuu xeer yahay ee aanu statement ahayn.

Khalaad badan baa ku jira xeerka oo xaga sharciga ah in la habeeyo ayaan soo jeedinayaa taasna,

**Qodobka 4aad farqada 3aa** ee kharashaadka dheeriga ha ina laga saaro ayaan soo jeedinayaa oo meesha kuma jiro oo meesha xeerku u socoda kuma jirto oo xeerku mushahar iyo guno ha ku koobnaado

**Qodobka 5aad farqada2aa** meesha in lag saaro weeye waayo mushahar iyo gunooyin uun baa laga hadlayaa ee laba mushahar kuma jiro, sidoo kale **farqada 3aad** iyana nuxurka xeerkuuna bay tilmaamaysaa markaa meesha ha laga saaro.

**Qodobka 6aad** waxay u baahan tahay in dib loo habeeyo oo la isku habeeyo oo dib loogu noqdaa oo sida uu u qoran aaanay ahay si xadid farqadihiisu.

Qodobka 7aad waxaa la xadida mushahar, waxaad moodaa in mushaharkaa la xadiday aanu isu dheeli tirnayan, waxaad moodaa miisaan iyo qiimayn inaan lagu samayn oo dad aqoon leh ayaa meesha ku jirta,

**Qodobka 9aad** waxaad moodaa isna inuu contradiction isku samaynayo oo iska hor imanayo, isaga waxaan odhan lahaa hadii qodobkaa laga dhigayo mid dhaxaltinimo waa in hawlgabka meeshalaga saara.

Qodobka 10aad marka la ansixiyo ayay lifaaq u noqon doontaa oo xeerkan ka horeeyay ma jirin, sidoo kale wakhtiga dhaqan galka in la tilmaama bay ahayd oo sidii aynu ku qori jirnay xeerarka marka uu dhaqan goluhu ansixiyo madaxwaynuhuna saxiixo ayuu dhaqan galayaa.

Sidoo kale qodobo dhawr ayaa ka dhiman oo u baahan in lagu daro oo laga maarmaan ah. Waxaana anigu soo jeedinayaa goluhu markuu xeer ka doodayo qofwalbaa arragti bu ka leeyaha, markaa qofwaliba arragtidiisa ha lagu ixriraamo.

## Xill. Cali Xasan Maxamed

Marka xeer laga doodayo oo la xadaynayo waa laga doodayaa ee la isku ceebaynmaayo, waayo xeerkan waa dastuuri ah anagoo gudigii dhaqaalaha ah ayaan golaha soo dhignay waa laga dooday muuna socon ee la diiday

Anigu in la yareeyo wixii west ah meesha laga saaro, isla markaa la xadido anigu waan qabaa, oo anigu waxaan waafaqsanay c/qaadir jirde hadii uu lahaa waxeena aynu isku filaysiino.
Inta aynu bil kaliya qaadano ayuu askarigu qaataa markaa maaaga inaan mushahar 6,500,000 inaan meesha soo dhignaa waa ceeb, oo wuxuu kordhayaa 400%, markaa ee xeerkan waxaa fiican inaan xukuumada kala tashano.

Waxaan idin xusuusinayaa dawladani wali wax miisaaniyad ah ma samayn oo wali may keenin, tii horaa lagu dhaqmayaa wali, markaa aan mudnaanta siiyo korodha mushaharka shaqaalaha iyo ciidamada.

Laba miduun baa inoo balansan oo ah inaan xukuumada la tashano iyo inaynu codoon u qaadno teebaynu samaynaa.

## Xill. Maxamed jaamaca cabdi

Waxaan haynaa hawl qaran oo dastuurkaa ina horyaal inagu waajibiyay, intaa markaa ka baxo waxaan ka hadlayaa dhowr qodob oo ay ku horayso:-

**1.** Dastuurnimada xeerka iyo magacii loo bixin lahaa oo uu aniga ila qaadan laha
**2.** Qiimaynta mushaharooyinka iyo gunooyinka xeerku tilmaamayo iyo sargawntooda iyo qaybkay noqonkarto
**3.** Doodaha iska soo horjeeda ee xubnaha golaha iyo xukuumadu ku kala salaysanyihiin.
**4.** Iyo gaba gabada aan qabo inaan ku soo khatino ee aan anigu qabo.

1. Datuurnimada xeerka waxaan akhriyayaa afar qodob oo dastuurka ka mida oo mid waliba mushaharka ka hadlayo.
    - **Qodobka 47aad** ee dastuurka oo sheegaya in mushaharka golaha wakiilada uu xeer qeexayo,

- **Qodobka 65aad** ee dastuurkuna isna wuxuu sheegayaa in xubnaha golaha guurtidu yeelanayaan mushahar iyo gunooyin xeer qeexayo,
- **Qodobka 87aad** ee dastuurka wuxuu leeyahay madaxwaynahah iyo ku-xigeenku waxay leeyahay mushahar, gunada iyo hantida kale waxaa qeexaya xeer,
- **Qodobka 98aad far3aad** wuxuu leeyahay daryeelka ku bahoon garsoorka xeer baa qeexaya.

Afartaa qodob ee dastuurka ku xusan waxay sheegayaan madaxdaa ku qoran mushaharkooda iyo gunooyinkooda xeer baa qeexaya, inagoo taa ogsoon waxaynu ajendeheena ku darsanay oo ansixinay in aynu samayno xeerkii mushaharooyinka Madaxwaynaha, ku-xigeenka iyo Golayaasha Qaranka. Marka la yidhaahdo xeerkaasi dastuurkuu ka dheegmayaa oo golayaashan mushahrkooda ayuu ka hadlayaa, maxaa Golihii Wasiirada looga qiyaas qaadanayaa maxaase looga reebay?.

waxaan qabaa xeerkani, waxaanu qabyo ka yahay afartaa qodob ee dastuurka oo ah inuu mideeyo mushaharka ku qoran, wuuna dacal dheeryahay xaqiiqda dalka wuu ka fagyahay, korodhkana laguma salayn laguma jaangoyn dakhliga dalka oo nuxurkeedu yahay cashuurta dalka, waana inaan gaynteeda bir kujarin, xukuumaduna dakhliga aanay beenka sheegin oo waxaa ka go’aya inoo sheegto, markaas aynu goynta wada gaadhno oo aynu qorno dhakhliga uga go’ikara. Dastuurkuna wuu maamuusay xubnaha ku qoran ee aan tilmaamnay mudnaantay leeyihiin.

Shaqaalaha iyo ciidamada waxaan qabaa in musharka loo kordhiyo oo sidii kulmiye hore u balan qaaday fuliyo sida ay ku kordhinaysona waa si farsamo ah, musharka madaxwaynaha, garsoorka iyo goloyaasha qarankana waa in dakhliga lagu jaangoyo, mushaharooyinka dowlad walbana dakhligeeda ayaa lagu jaangooyaa.

Soo jeedin:-

- Inaynu gudi farsamo usaarno arintaa xeerka, xukuumadana lagala tashado waxaay helikaraan ee runta ah oo inta xeerka la ururinayo aynu helno dagaalkaasina aanu cidla ingaga dhicin.
- Sharcigu hadii aanu maslaxada qaranka ka hor imanayo dastuurkuu baalmarayaa markaa ma fiicna in aynu biyo dhacno ee arintu ha noqoto inaynu dhigno xeerkan xadaynta mushahaarooyinka madaxwaynaha, garsoorka iyo golayaasha qaranka.

## Xill. Axmed Yaasiin Sh. Cali

Annigu waxaan qabaa waxna waa dastuuri waxna waa duruuf waaqici xadidayo, labadaas baanay muhiimadadeed tuhay in la xaddido oo umada loo cadeeyo, golaha wakiilada waxaa u xaq u leeyahay miisaaniyada qaran inuu wax ka dodo, wax ka badalo oo wax kala rarro xukuumadu siday kharashaadka u qoondaysay, markaa golahaa awoodiisu caynkaa tahay waa waajib inay mushaharkooda la xididdo, hadaan la xadiddina waxay

khatar ku tahay Qaranka. Waayo hadaad awoodaa wax lagu badali karto uu leeyahay headkooda waxay doonaan bay ku shaban karaan.

Markaa waa talaabo aad u wanaagsan, in golihii xukuumada ee cusbaana ee la doortay ay soo dhawayso oo madaxwaynihii la doortay soo dhoweeyay in xeerkan dhaqan galo. Madaxwaynahana marka uu xeerkaa dhaqan galiyo ayuu talaabo geesinimo leh qaadayaa. Markaa aynu xadiddno madaxwaynaha dee afkiisa ha kasoo baxdo laakiin inagu isku hawli mayno ee waajibkeena aan ka soo baxno oo aan xadiddno.

Toban sanadood buu dastuurka Somaliland sharci yahay oo loo codeeyay, markaa mushaharka madaxwaynhaha iyo golayaasha xeerbaa qeexaya ayaa ku-taal, markaa xeerkii toban sano la sugayay inaan samayno sharaf bay inoo oo ceeb maynaan galin ee waxaan gudanay waajibkeenii dastuuriga ahaa.

Golahani intaan xeerka la soo qaadin baa mooshin lagu fulinayo balanqaadkii xukuumadani gashay ee kordhinta mushaharooyinka Shaqaalaha iyo Ciidamada la keenay, hadeertana ansixinmayno Miisaaniyad aan lagu soo darin kordhintaa mushaharka shaqaalaha iyo ciidamada, sidaasaana umada u sheegaynaa na dooratay ee aan matalno.

Markaa kordhintu waa shaqaalaha iyo ciidamada mushaharkooda, kana waxaan leenahay ha la xadeeyo, ha la xakameeyo oo ha cadaado daahfurnaana ha yeesho. Anagu xukuumada is arragnay oo ka munaaqishoonay, waxaana nidhi waa inaad noqotaan dawladii daahfurnaanta iyo dawlad wanaaga aad noqotaan oo musuqmaasuqa baabi’isaan oo waxaaas oo dhan ku magacyelataan, waliba shuruucda dhaqaalaha ku saabsan ee daahfurnaanta dhalinaysa markii horaysay ee soo baxaan aad dhaqan galisaan, sharafbayna idiin tahay dalkayna wax u kordhinaysaa.

### Waxaan soo jeedinayaa:-

- In waxeena yar ee kooban maxduud noqdo kharashayntiisu, si uu ugu ful kala badh baahiyaha aynu qabno.
- Dadwaynaha waxaan ka raaligalinayaa ee daymihii saaxafada la isku dhaafshaday, waxaana u sheegayaa dadwaynahay xukuumada dakhliga way soo ururisaa, way soo diyaarisaa waanay soo habaysaa, markaa golahay la timaadaa oo eega una approvegarayaa kharashkaa la soo odorsay sanadkaa.
- Inaynu fuudhka saarno kharashak xukuumadu keenayso sanadka 2011, muhuumada kowaadna ee kharashkaa la eegayaana waa inaan ka aragnaa korodhka mushaharka shaqaalaha iyo ciidamadu inuu si haboon u korodhsanyahay. Kadibna waxaa biriyootiga labaad yeelanay in xadiday mushaharka madaxwaynaha iyo golayaasha oo xeer soo saaray.

## Xill. Waabeeye.

Mudanayasha mooshinka keenay waxaan qabaa inay xaq u leeyihiin oo sharciyadu siisay, inaynu xeerkaa samaynaa ay tahay awoodaheena, xeerkan aan ka hadlaynana waxaa la

yiraahdaa xeerka xadaynta mushaharooyinka madaxwaynaha, ku-xigeenka iyo golayaasha qaranka.

Runtii markaad maqasho erayga mushahar, waxaad markiiba xasuusanaysaa in laga hadlayo oo ku biyo shubanayo lacag.

## Xill. Xaashi.

Xeerkan waa wax dastuuriya oo samayntiisa aan xaq u leenay, inaguna halkan baynu ku jirnaa hadaynu parliamentigii nahay waxaan ka hadalaynaa waa sharci oo inagu xaq u leenahay inaynu xeerar samayno, isla markaa ansixino.

Marka laga hadlayo kordhinta mushaharka, waxaan leeyahay muhiimada ha la siiyo Shaqaalah iyo Ciidamada, hadaynu baarlaman nahay Doon baynu wada saaranahay oo halka waxaan u joognaa waa umada oo shaqalaha iyo ciidamada difaacaynaa 20 sanadood 200,000 bay qaadanayeen, intaana ha loo kordhiyo mushaharka ayaan leenahay.

**Waxaan soo jeedinayaa**

- xeerkan waa inuu socdaa, kala xadayntu waa inay socotaa, oo qoraxdaa horteedaa wax lagu kala qaybsadaa, xeerkani waa inuu socdaa.

## Xill. Ibraahim Jaamac Cali (Rayte)

Waxaan aad uga xumahay majara haabinta ujeedada iyo macnaha xeerkani uu lahaa, oo golaha iyo dadwaynaha la isku xoqo. qaabka uu goluhu ku go’aan gaadhaanaa waa dood oo aan hada u wadno ay xukunto golaha majoritigiisu, golaha iyo xukuumadana wax khilaafa oo ka dhexeeyaa ma jiraan,

Arrinka la doonayaa waa in la xadeeyo oo la xakameeyo mushaharka dadka madaxda ah, waxaana ugu horeeya Madaxwaynaha, ku-xigeenka, wasiirada iyo Golayaasha Qaranka iyo madaxda kale ee garsorayashu ka mid yihiin. Hadaan la iwaydiiyo mushaharka inaasi qaadato oo anigoo xilldhibaan ah la Iwaydiiyo garanmaayo, waana arrin aan la socon hanaakeena dimuqraadiyada ah, waa arrina ka horjeeda la dagaalanka musuqmaasuqa, haday xeerarku adagyihiin way adagtahay in musuqmaasuq la sameeyo, xeekanina waa anit-corruption.

- Anigu waxaan qabaa xeerka magaciisu inuu noqod (***Xeerka Xadaynta Mushaharka Madaxda Qaranka.)***
- ***(Madaxda qarankana)*** loogu fasiro inay tahay madaxwaynaha, ku-xigeenka, golaha wasiirada, golayaasha sharcidejinta, garsoorka, xeer ilaa-liyaha guud iyo hantidhawraha guud.

- Hadii laba xeer laga kala dhigayo waxay ahayd in labada xeerba la soo dhigo oo laga wada dodo, mooshinku sidaasu u qornaa, oo waxay ahayd intaa halkan ku qoran baa mooshinka ku qornayde in la wada keeno.
- Waxaan kaloo qabaa in xilldhibaanadu budgetka waxba ugu baahnayn, ee wasiirka maaliyadu wuxuu sheegay in 30% kordhayo odorska uu sameeyay isagu, markaa budgetka guud intaan ku lahayn baa inoo kordhaya, sida uu ugu kordhayo cidkastoo budgetkeedu miisaaniyada ku jirtay. Marka hadii budgetku haduu inuu kordho ayaan ka hadlayaa.
- Goluhu inuu meel isug yimaado oo xadido budgetka madaxda, madaxwaynaha iyo xukuumadana ra'yigooda arrintaa la tixgalino weeye, oo ra'yi la isu keeno. Waxaana jecelahay in xeerka halkiisii lagu soo celiyo, sharci darjintu wax la wadaago maaha ee talada ayaa la wadaagaa, golahaana sharciga go'aan ka gaadhistiisa waxaa iska leh shirgudoonka iyo mudanayashan.

## Xill. Maxamuud Axmed Obsiiye

Annigu waxaan qabaa:-

- Xeeka ujeedada loo sameeyay waa kala xadaynta mushaharka madaxwaynaha, ku-xigeenka iyo golayaasha, iyo madaxda sare ee hadeer lagu soo kordhiyay, qodobkaa waxaa looga dan lahaa inay madaxdaasi sare umada u shaqeeyaan, markaa umada ay u shaqaynayaa waa inay balan ama heshiis la galaan, oo waxay qaadanyaan wa inay xadiddnaata.

- Hadii waxay qaadanayaan aan la xadiddin, waxay noqonaysaa qodobkii uu ka dagaalamayeen sharci dejiyugu, oo musuqmaasuq iyo xoolo urursi ay dhacaan, sidaa darteed xeerkaasi ahmiyadaas buu leeyahay.

- Qodobka kale meesha ku jiraa waa korodhka nololeed ee maalin walba dhacaya inuu la jaanqaado iyaduna meesha waa ku jirtaa. Ilayn markii hore dastuurka laguma xadidin waxay qaadanayaan madaxdaasi, waana waxa Golaha Wakiiladu u xadidayaan.

- Sidoo kale, waa in aan la isku dherarin oo isku maxwaynaha oo aan nidhi 65 minlayan buu bishii qaadanaya iyo askariga $40 qaadanaya, laba masuuliyadood oo kala muhuumsan bay hayaan, oo madaxwaynuhu wa muraayadii qaranka.

- Markaa hadii wax la kordhiyo gunada fadhiga la kordhiyo weeye, ee aan la kordhin mushahar, waayo, waa tan cid shaqaysa iyo cidaan shaqayn lagu kala saari karaa oo lagula xisaabtami karaa qofkaan shaqayn weeye, ilayn ma

sinee qof shaqeeya oo Golaha yimaada iyo qof aan shaqayne, oo waa inuu abaal marin ku helaa qofka shaqeeyaa.

**Waxaan soo jeedinayaa:-**

- Waxaa ka muuqatay doodeenii, inanu xeerkani dhamaystirnayn, markaa xeerka ha la dhamaystiro oo wixii qabyo ah laga daro.
- In dib loogu noqdo mushaharka iyo gunooyinka oo korodhku saameeyo gunada oo kaliya.
- In gudi loo saaro golaha oo xadidda inta korodhku noqonayo iyagoo xukuumada la tashanaya talada haysa, oo kadibna xeerkaa la meel mariyo marka gudiddu ka soo talo bixiso ee soo celiso.
- In meesha laga saaro waxa goluhula la karayo, oo ah saluug Maamul iyo saluug dhaqaale, markaa taana waxaan fari lahaa shirgudoonka sidii arrintaa loo soo afjari lahaa.

## Soo ururintii dooda mudayaasha:-

1. In guddi loo saaro xeerka ku soo salaysa dakhliga dalka oo xukuumadan kala soo munaaqishoota, ka dibna xeerka la isku ururiyo oo la ansixiyo.
2. In dib loo dhigo xeerkan, oo marka shaqaaalaha iyo ciidamada loo kordhiyo mushaharka la keeno

**Cawad Cali Maxamed**
**Agaasimaha waaxda Hadal Qoraalka G/Wakiilada**
**---------------------------------------------------------**
**-**

**C/risaaq Siciid Ayaanle**
**Xoghayaha Guud ee Golaha wakiilada JSl**
**---------------------------------------------------**